# DHAMBAALKA AGA

**HADAFKAYAGU WAA HIILKA AFKA HOOYO & HAL-ABUURKIISA**

WAA DHAMBAALSIDE AFAR-BILOODLE AH OO KU HADLA CODKA
AKADEMIYA GOBOLEEDKA AF SOOMAALIGA

TIRSIGA 25AAD, SANNADKA 9AAD, JANAAYO–ABRIIL 2026



## Hambalyo & Bogaadin

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti Md Ismaaciil Cumar Geelle

Fiiri Bogga 2aad

## Raysalwasaare Kuxigeenka Soomaaliya oo Xiray Kalfadhiga Golaha Fulinta AGA

Fiiri  Bogga 8aad



## Fadhiga Wasiirrada Dhaqanka/Hiddaha ee Dawladaha AGA oo ka Dhacay Muqdisho

Fiiri  Bogga 6aad

## Kalfadhiga Golaha Fulinta AGA oo ku Qabsoomay Muqdishdo

Fiiri Bogga 6aad

## Xaflado lagu Maamuusay Xuska Maalinta Caalamiga Afka Hooyo

Fiiri Bogga 9aad



**Xafladda Xiritaanka Kalfadhiga Golaha Fulinta AGA**

# TUSMADA TIRSIGAN

**1. Hambalyo & Bogaadin** ……………………………2
2. **EREYGA TIFAFTIRKA**
Dardargelinta Hawlaha AGA iyo Soo Noqoshada Dhambaalka AGA……………………………….............3
3. **QORMOOYIN HORTABIN MUDAN**
Afmaldaha Ekeeyaha ………………………………..4
4. **WARARKA WAXQABADKA AGA**
Wasiirka Waxbarashada DFS oo Shirguddoomiyay ……...6
Kalfadhigii Golaha Fulinta AGA oo ……………………...6
Warmurtiyeedka Golaha Fulinta AGA…………………...7
Ra'iisulwasaare Kuxigeenka Soomaaliya oo soo Xiray…...8
Wasiirka Madaxtooyada DDS oo Ballanqaaday Garab istaagidda Rugta AGA ee DDS…………………………...8
Xaflado lagu Xusayay Maalinta Afka Hooyo oo lagu Qabtay Dalalka Geeska AfriKa …………………………………..9
**5. WARAR KALE OO XUSID MUDAN**
Xuska 40guurada Suugaanta Abwaan Axmed Aw Geeddi……………………………………………..10
Qabsoomidda Shirweynaha 3aad ee Waxbarashada Soomaaliya ………………………………………………...11
Muqdisho & Jigjiga oo lagu Qabtay Bandhigga Buugga Baadigoobkii Nabadda Geeska Afrika …………………11
**KORORSO AQOONTAADA AFKA HOOYO**…13
Maansada Mar-la-Arag…………………………………...14
Guntanihii Dadweynaha …………………………………15

## GOOSANKA TIFAFTIRKA

**Tifaftiraha Sare**
Mustafa C.Fayruus

**Agaasimaha**
Axmed M.Dhicisow

**Madaxa Farsamada**
Maxamed Muxiyadin (Carab)

**Kaaliyaha Tifaftiraha**
Cabdulqaadir Diini

**Xoghayaha Titaftirka**
Saynab Xaaji Axmed (ugbaad)

**Bahda Tifaftirka**
Cabdullaahi Shiikhaaloow
Cabdiraxmaan Abtidoon
Dayax Axmed-Iley

**Kala xirii : info@aga.so**
**Facbook: @aga.afsoomaali**
**Twitter:@somaliacademy**
**Website:www.aga.so**

## BOGAADIN IYO HAMBALYO



Guddoomiyaha Akademiye Goboleedka Af Soomaaliga AGA, Macallin Siciid Saalax Axmed, isaga oo ku hadlaya magaciisa, magaca guddoonka, guddiga fulinta, xeeldheereyaasha, iyo hawlwadeennada AGA, waxa uu dhambaal hambalyo iyo bogaadin ah u dirayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti, mudane **Ismaaciil Cumar Geelle** oo mar kale loo doortay xilka madaxweynenimo; wuxuuna ugu ducaynayaa in Rabbi la garabgalo xilkaa.

Akademiye Goboleedka Af Soomaaligu, waxa ay qiraysaa dadaalka joogtada ah ee uu madaxweynuhu ku bixiyo u hiillinta afka hooyo. Waxa aan la illaawi karin halkii baylahda ahayd ee uu ka soo qaaday af Soomaaliga, ilaa uu gaarsiiyay yagleelidda akademiyad ka shaqaysa. Waxa ay Akademiya Goboleedku hubtaa in madaxweynuhu uu garab ugu noqon doono hawsha daryeelak hormarinta af Soomaaliga ee uu horeba hormuudka uga ahaa.

**U hiilli Afkaaga Hooyo**

*Guddoomiyaha*
*Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga AGA*
*Macallin Saciid Saalax Axmed*

## EREYGA TIFAFTIRKA

### Dardargelinta Hawlaha AGA iyo Soo Noqoshada Dhambaalka AGA

Waxaa farxad iyo raynrayn u ah guud ahaan masuuliinta iyo hawlwadeennada Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga (AGA), gaar ahaanna bahda tifaftirka, in mar kale uu innoo soo noqday Warsidaha AGA, oo loo bixiyay Dhambaalka AGA, oo la tebayay muddadii labada sanno ahayd ee uu innaga maqnaa. Waxaan rajaynaynaa inuu la soo noqday kaalintiisii iyo dheeraad, dadaalkiisii iyo firfircooni hor leh, iyo qalin intii hore ka cuddoon, iyo dhambaalka afar-biloodle ah, halkuu markii hore saddex-biloodle ka ahaa. Saaxiibbayaal, soo noqosho wacan !

Erayga tifaftirka ee tirsigan 25aad, waxaan uga faa'iidaysanaynaa inaan dhowr arrimood si kooban isu dultaagno.

Soo noqoshadan warsiduhu waxay qayb ka tahay dardargelinta guud ahaanba hawlaha Akademiya Goboleedka ee ka soo baxay kalfadhigii u dambeeyay ee Golaha Fulintu uu yeeshay muddadii 09 -12/02/2026; oo ka duulayay Shirwaynihii Saddexaad ee AGA oo 1-4 Noofambar 2024 ku qabsoomay Jabuuti.

Kalfadhigan Galaha Fulintu wuxuu qiimeeyay waxqabadkii iyo hawlihii AGA ee sannadadii ina soo dhaafay, waxaa la falanqeeyay waayaha ku xeeran af soomaaliga iyo adeegsigiisa, waxaa la jaangooyay hiigsiga AGA iyo hawlaha hortebinta mudan, waxaa la dejiyay qorshe-hawleedka guud ee ilaa 2028.

Ma aha kalfadhiga Golaha Fulinta AGA keliya, waxaa isna ku sidkanaa, oo qabsoomay fadhiga wasiirrada dhaqanka/hiddaha ee dawladaha AGA ku bahoobay.

Kulankani wuxuu ahaa riyo uu Guddoomiyaha AGA Macallin Siciid Saalax uu ku hamiyayay sannadkii la soo dhaafayba.

Ka dhabaynta riyadaa, waxaa ku garabgalay, hadduuna uga xamaasad badnaynba, Wasiirka Waxbarashada Soomaaliya Md. Faarax Sheekh C/qaadir. Abaal bur iyo dheeraad ah ayay Akademiya Goboleedku arrintaa uga haysaa wasiirka. Wasiir kun iyo kow jeerba mahadsanid!

Guddoonka AGA waxay wasiirradaa ka socday dawladaha ka codsadeen in dawladahoogu ay kaalin firfircoon ka qaataan taabbagelinta hawlaha AGA loo igmaday ee loogu hiillinayo afkeenna hooyo.

Intii lagu jiray diyaarinta tirsigan, waxaa soo galay maalinta caalamiga ee afka hooyo. Waa munaasabad fursad gaar ah u ah u qareemidda afka hooyo iyo hiilkiisa. Akadeemiya Goboleedka Af Soomaaligu waxay munaasabaddan kaga qaybgashay barnaamijyo taxane ah oo kala duwan, oo isugu jira kulammo dadweyne, kuwo aqoonyahanno, waxayna ka kala dhaceen sida Muqdisho, Jigjiga, Gaalkacyo iyo meelo kale.

Tiir kale ayaa ka baxay bahda cilmiga iyo aqoonta iyo guud ahaanba ummadda Soomaaliyeed. Ilaahay naxariistiisa janno ha ugu deeqo e, waa Prof Cali Jimcaale Axmed (1958-2026), oo dalka Maraykanka ku geeriyooday 31 Maarso 2026. Marxuumku wuxuu ahaa kaalin weyna innagu banneeyay. Ilaahay haw naxariisto, oo ha u nuuro xabaasha

Ugu dambeyn, a*khris wanaagsan tirsiga 25aad ee dhambaalka AGA, iyo ka bogasho wacan!*

**AFKAAGU WAA AQOONSIGAAGA**

## QORMOOYIN HORTABIN MUDAN

### Afmaldaha Ekeeyaha (Qaybta 1aad)

Ekeeyaha waa jaad ka mid ah afmaldahyada tixdu u adeegsato farshaxanaynta falkinteeda. Waxay~~uxuu~~ leeyahay habraac u gaar ah oo loo cuskado xulashadiisa, micnaha afmaldah weliboo ka mid ah suugaan bilayaasha maansadu adeegsato waxa jira hogtixeedyo aan ekayn looga maarmin meerisayntooda.

Ekeeyaha waa isbarbardhigidda tixda laba dhacdoo kala jaad ah balse isku eg. Si kale had-daan u dhigno: 'Waa barbardhigid xogtebinta tixda xaalado kaloo la masa ah, si loogu soo jeed-iyo dareenka dadka'.

. Tusaale ahaan, sida:

Sida aar gantaal qaba
Waxaan gocosho reemaaba

Labadaa tuduc waxay ekaynayaan libaax hooto saableyda lagala helay, jibaadkiisana meel durug-san laga maqlo ayuu ku sifeeyey tixeeyuhu taahiisa. Isagoo isbarbardhigay gooha libaaxaa iyo taaha isaga ka baxaya.

Yicis aan koreyniyo
Sidaan ahay yatiin baan
Yuururaa agteedoo
Yabaqayga qaylada
Yaah ima tiraahdee
Waan yaabanee koow dheh

Lixdaa meeris, curiyaha jacaylka keli cusleeyey wuxuu ku maseeyey yicis dhallaan waayuhu ka eexdeen, ama ubad agoonnimo iyo rajanimo isku darsaday, ehel u miciina aan lahayn, siday nolosha ugu luufluufaan inuu ka dhigan yahay.

Ekeeyaha tixda, inta badan isbarbardhigidda dhacdooyinka waxaa loo adeegsadaa ereyada*:* *''Sida iyo ama''* oo aalaaba, suurtageliya isku masayntooda; tusaale ahaan, tixda Raage Ugaas ee:

Sida koorta yucub oo la sudhay,
koromo buubaala
Shinni kaaluf galay iyo sidii,
koronkortoo oomi
Ama koox arda ahoo Quraan,
kaadibta u toostay
Ama beelo keynaana oo,
kor u hayaamaaya
Ama geel kareeboo nirgaha,
laga kaxeynaayo
Ama ceel karkarada jebshiyo,
webi karaar dhaafay
Ama habar kurkii iyo wadnaha,
lagaga kow siiyay
Ama kaal danley qeybsatey iyo,
kur iyo dhaal yaabis
Xalay kolola'aygii ma ledin,
kaamil reeruhuye.

Sagaalkaa tuduc ekayntooda gabyaagu wuxuu taxay sagaal dhacdo oo kala duwan oo dha-waaq dheer sameeya oo meel durugsan laga maqlo, wuxuuna ku maseeyey taahiisa derisku ka gam'i waayey.

Tan kale, mararka qaarkood waxaa dhici karta isbarbardhigidda dhacdooyinka iyadoon la adeegsan: *''Sida iyo ama''* haddana in tixda ekayn lagu saafo, mase badna, tusaale ahaan:

*Allayl dumay albaabadoo xidhanoo, uunku wada seexday*
*Onkod yeedhay uugaamo roob, alif ba-naatiiq ah*
*Iihdayda bixi baa libaax, iman la moodaaye.*

Saddexdaa meeris ee Raage mugdi kuma jiro ekayntooda iyadoo aan loo adeegsan (sida iyo ama); isbarbardhigiddoodana wuxuu u adeegsaday 'la moodaa'.

Mararka qaar isbarbardhigidda dhacdooyinka waxaa loo adeegsadaa hawraaro kala jaad ah macna ahaanse, suurtageliya ekayntooda, waxaana ka mid ah: ''Iiga dhigan tahay, iila cayn tahay, qaabaddoodii leedee iyo qaar kale'' tusaale ahaan, sida:

Amran waxay **u dhigantaa**
Cadceed dhalatay waaberi
Dhulka sagal ka soo baxay
Shucaaca dhiinkaa
Dhexda caad kaga maranyoo
Dhinacana falaadhoo
Jacayl isla dhaafsheen…

**Tuducda kale:**
*Qoraxdoo aroortii*
*Qaar la soo baxdoo*
*Aan caadku qarin baad*
*Qummanoow*
***Qaabaddeedii leedahay***

**Ekeeyaha Hilin Maanseedyada loo Adeegsado.**

Ekaynta dhammaan haltirinnada tixda way ku soohmaan: Gabay, geeraar, jiifto, hees ikk. Balse, hogagga laga tixeeyo isku si looguma adeegsado, oo way u kala mudan yihiin. Waxaa jira hilin maanseedyo aan ekayn looga maarmin in yar ha looga saafo ama in badan kay tahay. Haddaba, hilin maanseedyada ay ekayntu ku badan tahay waxaa ka mid ah:

1. *Calaacalka*
2. *Guubaabada*
3. *Digashada*
4. *Hogatusaalaha*
5. *Ammaanta*
6. *Jaceylka*

**Ekeeyaha Calaacalka Maansada**

Calaacalka waxaa ka mid ah, gabayga soo socda, ee uu tiriyey Cilmi Ismaaciil Liibaan (Boodhari). Wuxuu yiri:

Sida geel harraadoo wax badan,
hawdka miranaayey
Oo haro la soo duljoojiyoo,
kureygu heegaayo
Oo hoobey loo qaaday iyo,
hadal walwaaleedka

Kolkaad Hodan tiraahdaanba waan,
soo hinqanayaaye

Hadday howlyaraan idin la tahay,
aniga way hooge
Ayadaan xabaal lagu hamsiin,
waanan ka harayne
Hammada been baan idhi malaha,
waa la hurudaaye
Hareertayda oo maran baan is iri,
haabo gacanteeda
Goortaan hubsadey meel cidla ah,
inaan ku howshoodey
Hoggaansigeedii dambaan,
soo hambaabiraye
U heylhayley gogoshii sidii,
halablihii aare
Siday iga halleeyeen maryihii,
hiifay oo tumaye
Haabhaabtay labadii go'oo,
shaadhkii maan heline
U hammiyey sidii wiil la dhacay,
kadin ay haysteene
U handadey sidii geel biyaha,
hoobey loo yidhiye
U higleeyey sida naag la yiri,
huray dallaaqdaaye
Wax aanad hayn ood ku hammidaa,
hadimo weyaane
Hoheey iyo hoyeey maxaa,
hoodaamo lay geystey!

Gabaygan calaacalka ah, sida idinkaga muuqata tuducyadiisa madmadoobaysan waxay ku soohan yihiin ekayn. Faaqidaaddiisa innagoon wada gaari Karin, qormadeennoo xaddidan awgeed, bal aan yare iftiiminno meelo kooban.

*Sida geel harraadoo wax badan,*
*hawdka miranaayey*
*Oo hara la soo dul joojiyoo,*
*kureygu heegaayo*
*Oo hoobey loo qaadey iyo,*
*hadal walwaaleedka*
*Kolkaad Hodan tiraahdaan waan,*
*soo hinqanayaaye*

Afartaa tuduc Boodhari wuxuu isku barbardhigay gabadhuu jacaylkeeda la dhuubtay iyo geel bil iyo dheeraad biyo dibinta saarin oo la dulkeenay darkuu ka cabbi lahaa siduu ugu haliilo inay uga dhigan tahay.

*La soco qaybta labaad.*

*Macallin Cabdullaahi Sh. Cabdi (Gacanka)*

# WARARKA WAXQABADKA AGA

## Wasiirka Waxbarashada Soomaaliya oo Shirguddoomiyay Fadhiga Wasiirrada Dhaqanka/Hiddaha ee Dawladaha AGA



Wasiirka Waxbarashada Soomaaliya Md. Faarax Sheekh Cabdulqaadir ayaa 10/2/2026, waxa uu shirguddoomiyay kulan ay isugu yimaadeen wasiirrada Dhaqanaka/Hiddahaee dawladaha ku bahoobay Akademiya Goboleedka AGA,

Kulankaasi oo ka dhacay magaalada Muqdisho ayaa sidoo kale, waxaa ka hadlay wasiir kuxigeenka xafiiska dhaqanka & dalxiiska ee Dawlad Deegaanka Soomaalida Salaad Dhabbar iyo Danjire Maxamed Cabdi Afey, waxayna tilmaameen inay dawladahooda la wadaagi doonaan farriimaha Akademiya Goboleedka ee ku aaddan hrumarinta af Soomaaliga.

Guddoomiyaha AGA Macallin Saciid Saalax Axmed ayaa wasiiradaas ku wareejiyay Dikumenti (Document) iyo warbixin ku saabsan Akademiya Goboleedka, wuxuuna kulankaasi ka sheegay inay Akademiyadu u baahan tahay hiilka iyo taageerada dawladaha ay ka dhaxayso.

## Kalfadhigii Golaha Fulinta AGA oo ka Dhacay Muqdisho

Waxaa magaalada Muqdisho ku qabsoomay muddadii 09 -12/02/2026, Kalfadhiga Golaha Fulinta AGA, oo ah hay'adda ugu saraysa hoggaaminta iyo maamulka AGA.




Wasiirka Waxbarashada Soomaaliya Faarax Sh C/qaadir ayaa si rasmi ah u furay kalfadhigan, isaga oo Akademiye goboleedka AGA ku bogaadiyay waxqabadkeeda, isla markaana ballanqaaday inay garab taagan yihiin fulinta go'aannada ka soo baxa kalfadhigan. Waxaa kale kulankan ka hadlay wasiirka waxbarashada Jabuuti Dr. Nabiil Maxamed Axmed, wasiir kuxigeenka xafiiska Dhaqanka DDS Md. Salaad Dhabbar Yuusuf iyo ergayga af Soomaaliga ee Kenya Danjire Maxamed Cabdi Afey. Masuuliintani waxay tilmaameen kaalinta mugga leh ee AGA kaga jirto u hiillinta af Soomaaliga, waxayna ballanqaadeen in go'aannada ka soo baxa kalfadhigan ay dawladahooda gaarsiin doonaan.

Guddoomiyaha AGA Macallin Saciid Saalax ayaa warbixin ka jeediyay furitaanka kalfadhiga, kuna faahfaahiyay waxqabadka iyo qorshehawleedyada AGA, inkasta oo garab-istaaggii loo baahnaa aanay weli helin.

### Danjire Maxamed Cabdi Afey oo loo Magacaabay Ergayga Af Soomaaliga W. B ee Kenya

Danjire Maxamed Cabdi Afey oo ah ruugcadaa siyaasadeed ee Kenya ayaa loo magacaabay ergayga gaarka ee AGA ee deegaanado Soomaalida ee Kenya, oo ka mid ah dawladaha ku bahoobay Akademiya Goboleedka AGA. Danjire Afey ayaa ballnaqaaday inuu u hawlgali doono hiilka iyo horumarinta af Soomaaliga ee waddanka Kenya.

## Warmurtiyeedka Kalfadhiga Golaha Fulinta ee AGA

Waxaa magaalada Muqdisho ku qabsoomay Fadhiga Wasiirrada iyo Kalfadhiga Golaha Fulinta AGA 2026 muddadii 09 -12/02/2026. Waxaa shirka ka qaybgalay masuuliyiinta kala ah:

1. Mudane Faarax Sheekh Cabdulqaadir, Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha & Tacliinta Sare ee Soomaaliya.
2. Dr. Nabiil Maxamed Axmed, Wasiirka Wasaaradda Tacliinta Sare iyo Cilmibaarista ee Jamhuuriyadda Jabuuti.
3. Mudane Salaad Dhabbar Yuusuf, Ku-xigeenka Xafiiska Dhaqanka iyo Dalxiiska ee Dowlad Deegaanka Soomaalida, Itoobiya.

4. Danjire Maxamed Cabdi Afeey, ergayga AG Kenya.

Kalfadhiga waxaa martigelisay Dawladda Federaalka Soomaaliya, oo uu horkacayo Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha iyo Tacliinta Sare Mudane Faarax Sheekh Cabdulqaadir.

Kalfadhiga waxaa lagu dhegeystay warbixinnada hawlaha AGA iyo waayaha ku xeeran. Waxaa laga dooday hawlaha horyaalla AGA; waxaana lagu dejiyay qorshe-hawleedka guud iyo miisaaniyadda AGA ee 2025-2028.

Guddoonka AGA wuxuu masuuliyiinta ka socday

1. Xogwarranka Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga AGA.
2. Heshiiska Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga AGA.
3. Qorshe-hawleedka guud ee AGA 2025-2028.
4. Miisaaniyadda AGA ee 2025-2028

Masuuliyiintu waxay bogaadiyeen hawlaha dhaxalgalka ah ee ay qabato Akademiya Goboleedka AGA, iyo sida firfircoon ee ay u gudaneyso hawsha loo igmaday oo ah horumarinta, ilaalinta iyo daryeelka Af Soomaaliga.

Waxay ballanqadeen inay si buuxda u garab taagan yihiin hawlaha AGA, ayna ka shaqaynayaan xal u helidda baahiyaha AGA; isla markaana dhexda u xiranayaan helitaanka miisaaniyadda AGA iyo in dal kastaa bixiyo qoondada kaga aaddan miisaaniyadda.

*Ugu dambeyn,* Golaha Fulinta AGA wuxuu u mahadnaqayaa Dowladda Soomaaliya ee uu hoggaaminayo Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud oo martigelisay kalfdhigan, iyo Wasiirka Wasaarrada Waxbarasha Hiddaha iyo Tacliinta Sare Md. Faarax Sheekh Cabduqaadir oo la'aantiis aanu qabsoomeen fadhigani.

## Raysalwasaaraha Dawladda Federaalka Soomaaliya oo Buugaag ugu Deeqay Bahwaynta AGA

Raysalwasaaraha Dawladda Federaalka Soomaaliya Md. Xamsa Cabdi Barre ayaa 12/2/2026 Maktabadaha iyo bahwaynta AGA ugu deeqay saddex boqol oo buug, oo ah "Baadigoobkii Nabadda Geeska Afrika" ee uu qoray Danjire Maxamed Cabdi Afey.

Md. Xamsa Cabdi Barre ayaa sheegay inay akhristayaal badan ka faa'ideysan doonaan bugaagtaasi uu ugu deeqay Maktabadda iyo bahwaynta AGA,

## Ra'iisulwasaare Kuxigeenka Soomaaliya oo soo Xiray Kalfadhigii Golaha Fulinta AGA



Ra'iisulwasaare kuxigeenka Soomaaliya Md. Saalax Axmed Jaamac ayaa 11/2/2026 casho sharaf u sameeyay wasiiradii iyo xubnihii golaha fulinta AGA ee ka qaybgalay fadhigii Wasiirrada iyo Kalfadhigii Golaha Fulinta AGA.
Xafladdan oo laga akhriyay warmurtiyeedkii shirka, wuxuu R/wasaare xigeenku ballanqaaday in Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ay hiil iyo hooba la garan taagan tahay hawlaha Akademiya Goboleedka AGA.

Wasiirka Waxbarashada Faarax Cabdulqaadir oo isna casho sharaftaasi ka hadlay ayaa iftiimiyay sida af Soomaaliga & Akademiyada AGA ugu baahan yihiin taageero, wuxuuna madaxda sare ee dawladda Federaalka iyo dawladaha kalaba ku booriyay taageeridda qorshehawleedyada AGA ugu adeegayso afka hooyo.

Guddoomiyaha AGA Macallin Saciid Saalax ayaa madaxdaasi uga warbixiyay kalfadhigii golaha fulinta AGA, isagoo mahadnaq u soo jeediyay wasiirradii shirka ka soo qaybgalay, wuxuuna si gaar ah ugu mahadnaqay Wasiirka Waxbarashada Soomaaliya Md. Faarax Sh. C/qaadir oo suurtageliyay qabsoomidda kalfadhigaas.

## Wasiirka Madaxtooyada DDS oo Ballanqaaday Garab –istaagidda Rugta AGA ee DDS



Shir gaar ah, oo 5/3/2026 lagu qabtay Jigjiga, ayay wada yeesheen Wasiirka Madaxtooyada DDS Dr. Xuseen Qaasim, oo uu weheliyo Wasiir kuxigeenka xafiiska dhaqanka & dalxiiska ee DDS Md. Salaad Dhabbar, iyo Guddoomiyaha Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga Macallin Siciid Saalax iyo masuuliin kale oo weheliya, ayaa lagaga wada hadlay xoojinta Rugta AGA ee DDS iyo dardargelinta hawlaheeda.

Macallin Saciid Saalax oo kulankaasi ka hadlay ayaa wasiirka u gudbiyay baahida guud ahaan AGA iyo gaar ahaan rugteeda Dawlad Deegaanka Soomaalida .

Wasiirka Madaxtooyada DDS Dr. Xuseen Qaasim ayaa bogaadiyay hawlaha Akademiya Goboleedka guud ahaan, gaar ahaanna rugteeda Jigjiga, isla markaana ballanqaaday in DDS si buuxda isu garabtaagi doonto rugta Akademiyada ee DDS iyo guud ahaanba hawlaha AGA

**Wasiiru Dawlaha Arimaha Dibadda Soomaaliya oo AGA Guddoonsiiyay Bugaag,**

Wasiiru dawlaha Arimaha Dibadda Soomaaliya md. Cali Cumar Balcad ayaa 12/2/2026 tiro bugaag ah ugu deeqay Maktabadda AGA Wasiir Cali Balcad ayaa AGA, ku bogaadiyay hawlaheeda u adeegidda afka hooyo iyo hormarintiisa.

## Xaflado lagu Maamuusayay Maalinta Caalamiga ee Afka Hooyo oo lagu Qabtay Dalalka Geeska Afrika

Xaflado lagu maamuusayay 21 Febraayo, oo ah maalinta caalamiga ee afka hooyo, ayaa lagu qabtay dalalka Geeska Afrika ah, waxayna u dhaceen sidan:

**Muqdisho**



Xaflad ay soo wada qabanqaabiyeen Akademiya Gobleedka Af Soomaaliga (AGA) iyo Akademiyada Cilmiga, Dhaqanka & Suugaanta ee Soomaaliya ayaa 21/2/2026 lagu qabtay Muqdisho.

Xafladdan oo ka dhacday Xarunta AGA, waxaa ka soo qaybgalay wasiirro, xildhibaanno, maamulka G/Banaadir, madaxda labada Akademiyo & mas'uuliyiin kale; waxaana ka mid ahaa Guddoomiyaha Akademiyada Cilmiga, Dhaqanka & Suugaanta Md. Ismaaciil Yuusuf Cismaan iyo Kusimaha guddoomiyaha AGA Barasare Cabdalla Cumar Mansuur, iyo Lataliyaha AGA Md. Mustafa Fayruus; iyo sidoo kale Wasiirka Shaqada & Shaqaalaha Xildhibaan Saalim Caliyow Ibrow, Xisaabiyaha Qaranka Maxamed Dheere & guddoomiye kuxigeenka G/Banaadir Cabdicasiis Cabdow.

Wasiirka Waxbarashada Md. Faarax Cabdulqaadir oo soo xiray munaasabadaas ayaa shaaciyay in la qaban doono shir cilmiyeed ballaaran oo ku saabsan af Soomaaliga iyo daryeelkiisa

**Jigjiga**

Xaflad tan oo kale ah waxay 21/2/2026 ka dhacday Jigjiga, waxaana soo qabanqaabiyeen xafiiska dhaqanka iyo dalxiiska ee Dawlad Deegaanka Soomaalida iyo Akademiya Goboleedka AGA.



Masuuliinta ka hadlay waxaa ka mid ahaa Wasiirka xafiiska dhaqanka iyo dalxiiska ee DDS Warsan Dayib Cawil, Md. Axmed C/raxmaan Shiino oo ah xubin Golaga Fulinta AGA iyo wakiilka AGA ee DDS Macallin Maxamuud.

**Gaalkacyo**

Xuska maalinta afka hooyo, ayna iska kaashadeen AGA iyo Wasaaradda Isgaarsiinta, Warfaafinta iyo Dhaqanka ee Puntland ayaa 21/2/2026, ayaa lagu qabtay dugsiga sare ee Cabdirashiid Cali Sharmaarke ee magaalada Gaalkacyo. Xuskaasina waxaa ka hadlay madax kala duwan.

## Guddoomiyaha AGA oo la Kulmay Hawlwadeennada Rugaha AGA

Guddoomiyaha AGA Macallin Saciid Saalax Axmed, oo uu weheliyo Guddoomiye kuxigeenka AGA Md. Ismaaciil Cabdi Axmed, ayaa kulan miradhal ah la yeeshay madaxda & hawlwadeennada xarunta AGA Jabuuti. Sidoo kale, Gudoomiyaha ayaa kulamo kala duwan la yeeshay masuuliyinta iyo Hawlwadeenada Rugaha AGA ee Muqdisho, Hargaysa iyo Jigjiga. Kulamadaa waxaa lagu falanqeeyay sidii loo labanlaabi lahaa hawlaha ruguhu qabtaan, iyado laga duulayo qorsho hawleedka AGA.

## WARAR KALE OO XUSID MUDAN

### Xuska 40guurada Suugaanta Abwaan Axmed Aw Geeddi

Xaflad lagu maamuusayay 40guurada suugaanta iyo waxqabadka Abwaan Axmed Aw Geeddi Maxamuud ayaa 17/4/2026 lagu qabtay Hargeysa. Xaflad oo aad loo soo agaasimay, waxaa ka soo qaybgalay masuuliin, aqoonyahan, dhallinyaro, abwaanno, iyo guud ahaanba waxgaradka bulshada.

Wasiirka warfaafinta SomaIiland Md. Barkhad Jaamac Batuun iyo guddoomiyaha Akademiya Goboleedka Macallin Saciid Saalax oo goobta ka hadlay ayaa abwaan Axmed Aw Geeddi ku bogaadiyay dadaalkiisa dhinaca fanka ee soo taxnaa muddadaa afartanka sanno ah, waxay ku tilmaameen ruugcaddaa suugaaneed. Abwaan Axmed Aw Geeddi oo isna xafladaasi ka hadlay ayaa ka sheekeeyay heerarkii kala duwanaa oo ay soo martay laga soo bilaabo 1985, isagoo ballanqaaday inuu sii wadi doono, oo aanu ka daalayn.

Abwaan Axmed Aw Geeddi waxa uu ku dhashay magaalada Berbera sannadkii 1966; Hargeysa ayuuna ku barbaaray waxna ku bartay, ilaa haddana degan yahay.




### Taariikh Nololeedkii Prof Cali Jimcaale Axmed (1958-2026)

Cali Jimcaale Axmed 1958 ayuu ku dhashay Muqdisho, waxbarashadiisa wuxuu ku kala qaatay Soomaaliya iyo Maraykanka, wuxuu shahaadooyinka Master iyo PHD ka qaatay Jaamacadda UCLA, USA. Wuxuu bare ka noqday JUS, kaddibna Jaamacadda City University of New York, USA, oo uu muddo dheer madax ka ahaa qaybteeda suugaanta caalamiga.

Prof. Cali Jimcaale wuxuu kaalin firfircoon ku lahaa cilmibaarista arrimaha Soomaalida. Wuxuuna u ololayn jiray, kana shaqeeyay, sidii dib loogu hufi lahaa waxyaabihii hore looga qoray. Wuxuu ururiyay, tifaftirayna buugga *'The Invention of Somalia (1995)'*, wuxuuna qoray buugga *'Daybreak Is Near (1996)'*, wuxuuna ka mid ahaa aasaasayaasha iyo tifaftirayaashii *'Journal of Somali Studies (JoSS)'* ee London ka soo baxa.

Inkasta oo hal-abuurkiisa suugaaneed badiba ku qoray Luqadda Ingiriisiga, suugaanta Soomaaliga ahna wuxuu ku biiriyay sheeko-faneedda qiimaha badan ee *'Gaso, Ganuun iyo Gasiin (2018)'*. Profku wuxuu Maraykanka ku geeriyooday 31 Maarso 2026. Naxariistii Janno Ilaahay ha ugu deeqo marxuumka.

Aamiin



## Qabsoomidda Shirweynaha 3aad ee Waxbarashada Soomaaliya

Waxaa qabsoomay Shirweynaha 3aad ee Waxbarashada Soomaaliya, oo ay qabanqaabisay Wasaaradda Waxbarashda, Hiddaha & Tacliinta Sare, oo Muqdisho ka socday 8-11 Febraayo 2026. Shirweynahan waxaa ka soo qaybgalay masuuliin kala duwan, oo heer federaal iyo dawlad-goboleedba leh, khubaro waxbarasho, macallimiin, hay'adaha waxbarashada iyo wakiillo ka socda hay'adaha caalamiga.

Shirweynahan oo halkedhiggiisu ahaa *'Hiigsi Toosan iyo Horumar Tayaysan'*, waxaa diiradda lagu saarayay dibuhabaynta nidaamka waxbarashada tayaynta iyo horumarinta manhajka, tababarka macallimiinta, baahinta waxbarashada iyo qodobbo kale. Shirweynahani wuxuu la jaanqaadayaa qorshayaasha istaraatjiyadeed ee dalka, oo ay ka mid yihin Qorshaha Istarsatijiga Waxbarashada (ESSP 2022-2026), Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025-2029) lyo Aragtida Qarni Jirka 2060 (Vision 2060).

Shirweynahan waxa uu soo jeediyay talooyin hagaya horumarinta waxbarashada Waxaa talooyinkaa ka mid ahaa in sare loo qaado adeegsiga af Soomaaliga iyo halbeegaynta eraybixinta. Iyadoo laga duulayo in waxbarashadu tahay tiirka horumarinta karaanka aadanaha, nabaddhiska, dawlad-wanaagga iyo kobcinta dhaqaalaha, wasaaradda waxbarashadu waxay si kalle ah u qabanqaabisa shirweynayaal lagaga arrinsanayo waxbarashada iyo horumarinteeda.




## Muqdisho & Jigjiga oo lagu Qabtay Bandhigga Buugga Baadigoobkii Nabadda Geeska Afrika

Magaalooyinka Muqdisho iyo Jigjiga ayaa si kala gooni ah loogu kala qabtay bandhigga buugga "Baadigoobkii Nabadda Geeska Afrika", oo uu qoray Danjire Maxamed Cabdi Afey, ahna ergayga AGA ee waddanka Kenya.

Bandhigga buuggan oo Muqdisho ka dhacay 12/2/2026, laguna qabtay hoolka Shariif Saalax ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, waxaa ka soo qaybgalay Ra'iisulwasaaraha Soomaaliya Md. Xamsa Cabdi Barre iyo madax kale. Ra'iisalwasaare Xamsa wuxuu xusay in nabadda Soomaaliya ay muhiim u tahay guud ahaanba gobolka Geeska Afrika, buugganina uu mudnaan u leeyahay bulshooyinka gobolka; wuxuuna Md. Afey ku ammaanay dadaalkii uu geliyay nabadaynta.

Sidoo kale, bandhigii buuggan oo 27/3/2026 ka dhacay magaalada Jigjiga, waxaa ka soo qaybgalay Madaxweynaha Dawlad Deegaanka Soomaalida Md. Mustafe Maxamed Cumar, masuuliinta AGA ee DDS iyo masuuliin kale.

Danjire maxamed Cabdi Afey waa ruugcaddaa siyaasadeed oo ka soo shaqeeyay nabadaynta Geeska Afrika, wuxuu kaalin hoggaamineed ku lahaa shirkii dibuheshiinta Soomaaliya ee Kenya ka dhacay sannadihii 2002-2004.



## Tababbar loo Qabtay Naadiga Akhriska & Qoraalka Banaadir

Tababbar ku saabsan 'Midaynta Habdhigaalka Af Soomaaliga' oo uu soo qabanqaabiyay Naadiga Akhriska & Qoraalka Banaadir, ayaa 17/1/2026 lagu qabtay xarunta Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga (AGA). Tababbarkan oo qiimo weyn u lahaa horumarinta iyo mideynta habdhigaalka afkeenna hooyo, waxaa ka faa'iidaystay afartameeye ah xubnaha naadiga iyo dhallinyarada daneeya qoraalka iyo hal-abuurka, waxaana bixinayay Barasare Cabdalla Cumar Mansuur.

Habaynta habdhigaalku waxay ka mid tahay xirfadaha lagama maarmaanka ah ee qoraaga iyo qoraalkiisa. Taasi waxay tayo iyo quruxba u yeelaysaa qoraalka, waxayna fududaynaysaa in akhristuhu si habboon u helo farriinta iyo dulucda qoraanka. Hawlaha hortebinta u leh Akademiya Goboleedka AGA waxaa ka mid ah dhisidda iyo kobcinta xirfadda qoraalka iyo dhiirrigelintiisa. Sidaas darteed, mar walba waxay naadiyada akhriska iyo qoraalka, iyo guud ahaanba bahda qal-inleyda gacan ka siisaa sidii sare loogu qaadi lahaa, loona kobcin lahaa xirfaddooda qoraalka. Taba-barkanna dadaaladaas ayuu qayb ka ahaa.

## Maktabadda Dhijitaalka Soomaaliyeed oo la Daahfuray

Maktabadda Dhijitaalka Soomaaliyeed ayaa 13/4/2026 laga furay magaalada Muqdisho, waxaana soo qabanqaabiyay xarunta aqoonta dhijitaalka Soomaaliyeed oo maktabaddan furay, kana warbixiyay adegga maktabadda.

Waxaa goobta ka hadlay, tallaabadanna bogaadiyay, madax isugu jiray wasiirro, xildhibaanno, aqoonyahanno iyo waxgarad kale; waxaana ka mid ahaa Prof. Cabdalla Mansuur iyo Md. Mustafa Fayruus, oo ah masuuliin AGA ka tirsan.

## Cilmibaaris ku saabsan Cilmi-afeedka oo lagu qabtay Jigjiga

Cilmibaaris ku saabsan Cilimi-afeedka ayna soo qabanqaabisay Jaamacadda Jigjiga ee DDS ayaa 3/3/2026 lagu qabtay Jigjiga. Cilmibaaris waxaa soo bandhigtay Dr. Tamara Prischnegg oo ah kha-biir cilmi-afeedka kana tirsan University of Vienna, Austria.

Guddoomiyaha Akademiya Goboleedka Macallin Saciid Saalax oo ka hadlay saminaarkaasi, ayaa bogaadiyay jaamacadda Jigjiga ee soo agaasintay saminaarkaas. Masuuliinta kale waxaa ka mid ahaa Maryan C/llaahi oo ka tirsan guddiga fulinta AGA & Macallin Maxamuud oo ah Wakiilka AGA ee DDS.

## Bandhigga Suugaanta & Buugaagta Macallin Bashiir Badane

Buugaag suugaaneed kala duwan oo uu qoray Macallin Bashiir ayaa lagu soo bandhigay 22/4/2026 Muqdisho. Buugaagtan, oo siddeed buug ahaa, waxay isugu jiraan maansooyin uu curiyay, sheekooyin uu ururiyay iyo buugaag kale, oo dhammaantood ujeeddo barbaarineed huwan.

**U HILLI AFKAAGA HOOYO**

## KORORSO AQOONTAADA AFKA HOOYO

# Doodda Qabyannimada Farta Af Soomaaliga
## *'Shaqallada & Shibbanayaasha'*

Farta af Soomaaligu in ay qabyo tahay, sida dadka qaarkiis aamminsan yihiin, waa aragti aan qummanayn. Runtiisem fartani waa mid fadhida, oo ku habboon af Soomaaliga. Si aynu arrintan isula garanno waxa lagama maarmaan noqonaysa in la kala saaro laba shay: (1) daraasaadka cilmi-afeedka ee sida gaarka ah u falanqeeya codayntiisa afka (*phonology*) iyo (2) waxa loo yaqaan afka alifba'diisa (*alphapet*).

Waa ay adagtahay in, guud ahaan af alifba'da af kasta wada koobto dhammaan codadka uu afkaasu leeyahay. Keennuna kuwaas ayuun buu la midyahay. Dooddan sugnaanteeda waxyaabaha caddaynaya waxaa ka mid ah saddexdan arrimood ee soo socda:

1. Shibbanayaasha af Soomaaligu ma dhan yihiin?
2. Shaqallada af Soomaaligu ma dhan yihiin?
3. Erey lab iyo dheddigba noqda

Af Soomaaliga waxa jira codad shibbanayaal ah oo aan la qorin, ilduufna aan looga tegin. Xarfaha la qoro waa asaasi, maxaayeelay lagama maarmi karo. Tus.: ereyada ***d****al* & ***b****al*, oo ay isaga mid yihiin labada xaraf ee dambe (-*al*), waxaa micnahooda kala duway labada xaraf: ***d*** & ***b***, oo leh codad kala duwan waxayna labada erey u yeelaan macne kala duwan. Xarfaha noocan ah waxaa loo yaqaan "***phoneme***".

Taa cagsigeeda waxaa jira codad si ulakac ah looga tegay, waayo, macnaha erayada waxba kama bedelayaan. Noocan waxaana loo yaqaan "***allophone***". Waxaan tusaale ahaan u soo qaadanaynaa codadka p, iyo ereyada dab & dap. Inkastoo labada xarf b & p qaab ahaan ay kala duwanyihiin, haddana xarafka p uma yeelayo ereyga dap micne ka duwan midka dab. Sidaa awgeed xarafka p ma aha mid asaasi ah. Xarfaha kale ee la halmaalana waxaa ka mid ah: th [ð], ng [ŋ] iyo gh [ɣ].

**Astaamaha xarfahan *aan asaasiga ahayn waa* laba arrimood:**

1. Marna uma keenaan ereyga isbeddel micne oo gaar ah;
2. Shaqal ayaana mar walba ka horreeya, oo erey billowgiisa laguma arko.

Toddobada shibbane ee laballaabma ee la qoro, ka sokow, waxaa jira shibbanayaal kale oo laballaabma oo aan la qorin. Shibbanayaasha aan qoraal ahaan la laballaabin waa kuwa aanay waxba iska beddelin micnahooda, haddii la laballaabo iyo haddii kale, tusaale*: a****ff****ar afar (micnahoodu waa isku mid).* Iyadoo la raacayo xeerka dhaqaalaynta dhigaalka farta, ayaa ogaan ahaan looga tegay in qoraal ahaan la laballaabo shibbanayaasha qaar, iyagoo dhawaaq ahaan laballaabma.

Shaqallada af Soomaaliga shaqal waliba 4 cod oo kala duwan ayuu leeyahay, sidaas oo ay tahay 2 qaab uun baa la qoraa (shaqal dheer iyo shaqal gaaban). Weerta ayaana laga garan karaa in ereyga shaqalkiisu uu fududyahay ama culusyahay.

Tusaale ahaan, u fiirso shaqalka "*u*" iyo "*uu*" oo mid kastaaba labadiisa codi kala duwanyihiin:

> 2 shaqal ee culculus: *duul(ka)* iyo *dul(ka)*
> 2 shaqal ee fudfudud: *duul(id)* iyo *dul (dusha)*

Farta Soomaaligu waa far dhammaystiran oo si cilmiyeysan loogu jaangooyay baahida afka. In aan la qorin dhawaaq kasta oo la maqlo ma ahan qabyo, ee waa fududayn u adeegaysa afka iyo dadka adeegsanaya.

*Qoraa Dayax Axmed-iley ayaa ka soo koobtay*
***HABDHIGAALKA AF SOOMAALIGA GUUD,***
*Cabdalla Cumar Mansuur,*
*2024, Muqdisho bb. 5-12*

## SUUGAANTA & HAL-ABUURKA

### Maansada Mar-la-Arag

C/naasir Maxamed Cali

Maansadan Mar-la-Arag waxay soo baxday Abriil 2026; waxaana tiriyay C/naasir Maxamed Cali, oo ugu baroordiiqay Prof. Cali Jimcaale Axmed, waxaanan ka soo xigannay 'laashin.net'. Wuxuu yiri:

Ani maansadaydaan
Murugaa u sababoo
Maqaamkuu mudnaa Cali
Ma gaarsiin karaayee,
Macallin Cali Jimcaalow
Miftaaxii aqoontoow
Mufakirkii dadkeygoow
Mawjadaha cilmiga sida
Afka muunaddiisiyo
Halmuceedka erayada
Midki marin yaqaannee
Maay iyo maxaa-tiri
Dhiganiyo maqaallada
Waa hore ku muujoow;
Mirqiyaas hormuudow
Meecaadki guushiyo
Maareeye noloshaba
Mu'allifki qoraallada
Maskaxdiisa tuujiyay
Muhashada dareenkiyo
Moraalkaa dhisaysana
Mugdi buu dareemee
Tiiraanyo murugiyo
Mahurayno geerida
Muslin baan u nahayoo
Mabda' Eebbe weeyaan
Aan la moodi karinee
Marku mawdku kuu yimid
Murugaan dareenne
Allow noo miciin abid.
Maanfur iba furkiisiyo
Marjac iyo aqoontiis
Mahadhooyinkiisii
Mufti caalin weeyaan
Ma'wi aan gureyn iyo
Masraxyada adduunkeey
Dhax mushaaxayaanoo
Ishu milicsataa abid.
Maalmisooyin taariikh
Murti iyo oraahyada
Malihiyo oddoroskiis
Maadiisha sheekada
Ma illoobi doonnee
Allow noo miciin abid.
Qof muraad mar soo bida
Maya maadan oran jirin
Mansab doonna maahayn
Mid maciina maatada
Manfac iyo wax duni yaal
Maankiisa kuma jirin.
Mabda'iisu wuxu ahaa
Maqaraaruf diidnimo
Dad la maago ma oggola
Magansade cadliga fala
Macruuf buu ku caan baxay
Mintid aan baqaynoo
Dooddiisa meel adag
Muujiyay wanaag falid.
Cali inuu maqaam sare
Milgo waxey u siiyeen
Maamuus haldoornimo
Farax maansadeedii
Madaalow Jimcaalow
Marin guula baa tahay
Uga jiro maktabadaha
Madowgiyo caddaankuba
Way ka marag kacaayaan
Marla'arag inuu ahaa
Middaasa u maragfuri.
"Horizontal" ma moogiye
Qalinkiisa miidda leh
Mugi uu lahaay iyo
Ma macneeyay, Caliyow
Masna aragtidiisii
Masafadiyo jiiftada
Magaciisa ma ku laray
Mar kalana misaal wacan
Maasadii "iliidee"
Ina Cubtan hab maamuus
Meerisyada tusaalaha
Magiciisa ma ka dhigay
"The Invention" ma ku daray
"Daybreak" ma raaciyay!
Mar kalana maqaan sare
Madal qiimo badanoo
Laashino midoo hala
Milgo waxey u siiyeen
Maamuus haldoornimo
Farax maansadeedii
Madaalow Jimcaalow
Marin guula baa tahay
Laashin maamulkeydiyo
Masuulkii Wadaadee
Mahad saw umuu celin.
Mawlow Ilaahoow
Allow, macallinkeennii
Marti wacan ka yeeloo
Miisaanka khayr badan
Marxuum aad u roon tahay
Micigiisa aad tahay
Midigtiisa qabo oo
Milgo jano u siiyoo
Eebbe meertadaadiyo
Mudantii Fardowsiyo
Ku manayso meel wacan
Muslixiinta wehel iyo
Anbiyada la maaxgee.

*Aamiin*

# Guntanihii Dadweynaha

Macallin Maxamuud Cali Aadan Hoorri

Maansadan wuxuu Maxamuud ka jeediyay munaasabad baroordiiq iyo duco ahayd oo lagu qabtay 9 Abriil2026 Masraxa Prof. Shariif Saalax ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, maansada 'Guntanihii Dadweynaha' waxay tidhi::

Awrka gibilka loo xiray
Gondajiidka lagu raray
Guuraha habeennimo
Guradiisa lagu riday
Gurmadkii u heelnaa
Gaawaha u culi jirey
Afka goosankiisiyo
Kasmadii geyiga tiil
Garka wiilka haystaa
Foolaadka go’ay buu
Gobka haraca weyn iyo
Guryasamo ku furayaa.
Gundhigeedda xaajadu
Waxay galabta joogtaa
Garbadduubku weynaa
Galaayuusku badanaa
Gocashadan xanuunka leh
Geeridu ku marantahay
Gabalaaxsanmaynee
Gacalkiyo qaraabooy
Miyay golaha keeneen?
Guullow Allahayoow
Godka iilka loo qoday
Gaso iyo Ganuun baa
Gogol loogu fidiyeye
Gasiin awliyaad iyo
Gocosada macaan iyo
Gomonshaaga miidda leh
Ugu gaaci sabadkiyo
Goofkiyo hareeraha.
Garaadkii aqoontiyo
Gabbaadkii ogaalkiyo
Geedkii hadhka lahaa
Gorfayntii fankeenniyo
Galool mudhay iftiinkii
Suugaanta guunka ah

Giraanteedu culustahay
Gorgorkii u sahan tegey
Galalkeeda faaqiday
Godlin jiray tiraabaha
Gaagaxa ka caagnaa
Guullaha awoodda leh
Gacantiisu weyntahay
Geeridu xaq weeyee
Cali galabta oofsaday
Guranaa kashaydii
Godob lama gunnaystee
Godka xeerku culusaa
Miyaan geed la tegayaa?
Guntanihi dadweynaha
Waajibkiisa gudan jirey
Gunta, seeska sheekada
Guntimaha ku xiri jirey
Oo gogoldhig ararliyo
Gabalgabal u qori jirey
Guullaha awoodda leh
Gacantiisu weyntahay
Geeridu xaq weeyee
Cali galabta oofsaday
Guranaa kashaydii
Godob lama gunnaystee
Sirta gabaygu culusaa
Miyaan giisi karayaa?
Guntanihi dadweynaha
Waajibkiisa gudan jirey
Gunta, seeska sheekada
Guntimaha ku xiri jiray
Oo gogoldhig ararliyo
Gabalgabal u qori jirey
Guullaha awoodda leh
Gacantiisu weyntahay
Geeridu xaq weeyee

Cali galabta oofsaday
Guranaa kashaydii
Godob lama gunnaystee
Guurow ha joogee
Miyaan guuxi karayaa?
Guntanihi dadweynaha
Waajibkiisa gudan jiray
Gunta, seeska sheekada
Guntimaha ku xiri jiray
Oo gogoldhig ararliyo
Gabalgabal u qori jiray
Guullaha awoodda leh
Gacantiisu weyntahay
Geeridu xaq weeyee
Cali galabta oofsaday
Guranaa kashaydii
Godob lama gunnaystee
Giishkiyo Madiixii
Miyaan gaado karayaa?
Guntanihi dadweynaha
Waajibkiisa gudan jirey
Gunta, seeska sheekada
Guntimaha ku xiri jiray
Oo gogoldhig ararliyo
Gabalgabal u qori jiray
Guullaha awoodda leh
Gacantiisu weyntahay
Geeridu xaq weeyee
Cali galabta oofsaday
Guranaa kashaydii
Godob lama gunnaystee
Geeraarku culusaa
Miyaan goohi karayaa.

AFKAAGU WAA ASTAANTAADA

# Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga

**Akademiya Goboleedka Af Soomaaligu (AGA) waa xarun aqooneed loo abuuray daryeelka iyo horumarinta af Soomaaliga iyo hal-abuurkiisa suugaaneed. Waa madal ay ku bahoobeen dalalka Geeska Afrika ee Soomaalidu degto, af Soomaaligana lagaga hadlo.**

## Yoolka AGA

**Ilaalinta afka hooyo, ibafurka hal-abuurkiisa iyo turxaanbixinta adeegsigiisa, qoraal iyo qawlba; iyo inuu af Soomaaligu noqdo af-ka rasmiga ah ee maamulka & waxbarashada geyiga Soomaalida.**




Wasiirrada Dhaqanka/Hiddaha ee Dawladaha ku Bahoobay
Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga iyo Guddoonka AGA
09 Febraayo 2026, Muqdisho